JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |



# SHARCIGA DHISMAHA RUGTA GANACSIGA WARSHADAHA IYO BEERAHA
# SHARCI LAMBAR.GW35-25/93


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Sannadka 2022*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

SHARCI LAM: GW/35-25/1993

TAARIIKH. 25-10-93

UJEEDO: DHISMAHA RUGTA GANACSIGA WARSHADAHA IYO BEERAHA SOMALILAND.

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA SOMAALILAND.

ISAGOO ARKAY: QODOBKA 28AAD EE AXDI QARAMEEDKII BOORAMA 28/5/93.

MARKUU TIXGELIYEY: TALADII WASIIRKA GANCSIGA IYO WERSHADAHA.

MARKUU DHEGEYSTAY: GOLAHA WASIIRADA.

MARKUU ARKAY: OGOLAANSHAHA GOLAHA WAKIILADA.

WUXUU SOO SAARAY SHARCIGA SOO SOCDA

## QAYBTA 1AAD

### Qodobka 1aad

1. Sharcigan waxaa lagu dhisay ''Rugta ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha Somaaliland'' oo sharcigan lagu tilmaansan doono (Rugta).
2. Rugtu waa hay'ad Dhexe oo gaar ahaaneed, lehna jiritaan sharci ah (Juridical personality), kulmisana Ganacsatada, warshedley, Beeraley iyo Kallumaysato iyo Xoolo-dhaqatada.
3. Rugta xarunteeda waxay ku yeelanaysaa Hargeysa, laamaha Magaalooyinka Berbera, Burco, ceerigaabo, laascaanood, iyo Boorama.

### Qodobka 2aad.

### Ujeedooyinka (Objectives).

Ujeedooyinka Rugta loo dhisay waxay yihiin kuwa hoos ku cad.

1- Wakiil ka noqoshada Ganacsatada; Warshedlayda, Beeralayda, Xoolaleyda iyo Kallumaysatada, iyadoo Danaheeda ilaalinaysa, kana
2- shaqaynaysa horumarinta xirfadahooda.
3- U horseedida horumarinta dhaqaalaha dalka, iyadoo dhiiri-gelinaysa wax-soo-saarka kordhinaya wax dhoofinta.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

4- Raadinta suuqyada dibeda ee ku wanaagsan wax-dhoofinta iyo kuwo kale ee laga keeni karo badeecooyinka tayada fiican, qiimeheeduna hooseeyo.
5- Ururinta, iskudubaridka iyo faafinta wararka, qoraalada iyo warqadaha Rasmiga ah(documents) ee saameeya Ganacsiga, Wershedaha, Beeraha, xoolaha iyo Kalluumaysiga.

Ururinta iyo xafidaada Naamuunadaha (Samples), alaabooyinka la dhoofsho iyo kuwa la soo dejiyoba.

6- Lasocodka dhaqdhaqaaqa Ganacsi ee Gudaha iyo Dibeda
7- Qabanqaabinta carwooyinka gudaha iyo ka qaybgalka kuwa debida ee caalamiga ah
8- U dhexaynta dawladda iyo Hantilayda gaar ahaaneed iyo ukala gudbinta labada dhinac, talooyinka iyo wada tashiga arrimaha khuseeya horumarinta dhaqaalaha dalka iyo saamaynta shuruucda cusub ee sameeya Dhaqaalaha.
9- Samaynta Tabobarro gudaha iyo radinta kuwa dibeda oo gancsatada iyo shaqaalaha Rugtuba ka faa'iidaystaan
10- U kuur-galka dhibaatooyinka ka hor imanaya dhaqaalaha dalka iyo talo ka soo jeedinta sidii looga hortagi lahaa, iyadoo la kaashganaysa Guddiyo ka kooban aqoon yahano ku xeeldheer Arrimahaa.
11- Magcaabid ka qaybgalayaasha shirarka iyo siminaarada caalamiga ah ee khuseeya hawsha Rugta
12- Taakulaynta hantilayda gaar ahaaneed, siday u heli lahaayeen maalgelin hay'adaha gudaha iyo dibada.
13- Abaabulka xidhiidh iyo iskaashi ay la yeelanayso Rugaha iyo ururada Carbeed, Goboleed iyo Caalamiga ahba
14- Dhiiri gelinta hawl kasta oo horumarinaysa dhaqaalaha Dalka.
15- Ka qayb-qaadashada dib u dhiska dhaqaalaha dalka iyo nolosha bulshada

## Qodobka 3aad

## Adeega guud Ee Rugta.

Rugta waxay sameyn adeegyada hoos ku cad: -

B- Samaynta shahaado asal ah (Certificate of Origin) ee la raacsho alaabooyinka dalka laga dhoofsho Oo dhan.

t- Xaqiijinta Warqadaha rasmiga ah iyo saxeexyada Xubnaha Rugta (Documents and Signature Authetification).

J- Rumaynta Qaansheegyada ganacsiga (To certify Commercial Invoices).

## Qodobka 4aad.

## Dhexdhexaadinta (Arbitration)

1- Rugtu waxay dhexdhexaadinaysaa, marka laga codsado, muranka saameeya Ganacsiga ee dhex-dhaca ganacsatada gudaha amaba kuwa gudaha iyo ganacsatada dibedda.
2- Habka dhexdhexaadinta ee faqrada 1aad ee qodobkan waxaa loo cuskanayaa xeer-hoosaadka u gaarka ah.

# QAYBTA 2AAD.

## Qodobka 5aad

## Xubinimada Rugta

1- Rugta waxaa xubin ka noqon kara qof amaba cid kasta oo u haysta shati inuu fuliyo hawl la xidhiidha dhaqaalaha dalka gudihiisa, kana diiwaan-gashan Rugta bixiyeyna kharashka Rugta (Chamber Fee)



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

2- Xubinimada Rugta waxaa lagu codsanayaa qoraal, iyadoo lagu soo lifaaqayo warqadaha caddeynaya arrimaha ku sheegan faqradda 1aad ee Qodobkan.
3- Xubinimada Rugta waxaa la waayaya, marka uu xubin ku kaco falal ka hor imanaya ujeedooyinka Rugta loo dhisay.

## Qodobka 6aad

## Golaha Guud ee Rugta (general assembly)

1- Rugtu waxay yeelanaysaa Gole Guud oo ka kooban Xubnaha Rugta ee isugu jira Ganacsatada, warshadleyda, Beeralayda, xoolaleyda iyo kallumaysato. Ee rugta Rugta xubin ka ah.
2- Golaha Guud ee Rugta ayaa leh awooda ugu saraysa ee maamulka Rugta.
3- Shirka golaha guud waxaa ka qayb geli kara xubnaha rugta oo keli ah.

## Qodobka 7aad

## Xilka golaha Guud ee Rugta.

1- Doorashada Guudiga Maamulka ee Rugta.
2- Dejinta siyaasadda Guud ee lagu Maamulo Rugta.
3- Ogolaanshaha Miisaaniyadda Rugta.
4- Magcaabidda amaba doorashada Gudoomiyaha iyo xubnaha Guddiga Hanti-dhawrka Rugta.
5- Talo ka bixinta arrimaha la xidhiidha fulinta hawlaha Rugta.

## Qodobka 8aad.

## Shirka Golaha Guud ee Rugta .

1- Shirka Golaha Guud ee Rugta ee caadiga ah, waxaa la qabanayaa sannadkiiba hal mar.
2- Shirka Golaha Guud ee Rugta wuxuu ku ansaxayaa aqlabiyad caadi ah, codayntuna hal dheeri ah.
3- Haddii shirka Golaha ee Rugta loo waayo aqlabiyad, kulanka hore waxaa dib loo dhigayaa 15 casho, haddii mar labaadkana la waayo waxaa dib loo dhigayaa 7 casho, xubnaha kulanka danbe ka soo - qayb gala ayaa ansixinaya wax-qabadka shirkaa, haddii aanay tiradoodu ka yarayn saddex meeloodow meel ahaan (1/3,) tiradaa guud ee xubnaha Guud ee rugta.
4- Xubnaha Golaha Guud waxaa lagu wargelinayaa qoraal iyo qalabka warbaahinta (Wargeysyada iyo idaacadda), ugu yaraan 15casho, ka hor waqtiga shirka Golaha Guud ee Rugta.
5- Golaha Guud ee Rugtu wuxuu yeelana karaa shir aan caadi ahayn, haddii ay la noqoto Guddiga Maamulka e rugta amaba ay codsadaan shan meeleedow meel ahaan (1/5), xubnaha Rugta, iyagoo keenaya qodobada shirka (Ajendaha).
6- Doodaha shirka Golaha Guud ee Rugta iyo go'aamadiisa waxaa lagu qorayaa diiwaan u gaar ah, ay saxeexaan Guddoomiyaha iyo xoghayaha Guud eee Rugta.

## Qodobka 9aad

## Gudiga Maamulka ee Rugta.

1- Rugtu waxay yeelanaysaa Guddi Maamul oo ka kooban 15 xubnood.
2- Guddiga Maamulka Rugta, waxaa isu sharixi kara xubin kasta oo xilka xubinimada Rugta si buuxda u gutay.
3- Xubin kasta oo loo doortay Guddiga maamulka Rugta, wuxuu xilka haynayaa muddo 2(laba) sano ah. Kana bilaabantay taariikhda loo doortay.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

4- Xubinimada Guddiga Maamulka ee Rugta, waxay joogsanaysaa haddii 3 (Saddex)jeer oo isku xigta laga maqnaado, shirka Guddiha Maamulka sabab la'aan.
5- Xubinimada Guddiga Maamulka Rugta ee banaanaata, isla Guddiga Maamulka ayaa magacaabaya bedelkiisa, iyagoo ogeysiin doona Magacaabidaa cusub, shirka Golaha Guud ee Rugta ee ugu soo horeeya si uu u ansixiyo.
6- Xubinimada Guddiga Maamulka Rugta ee ku timaada bedel xubinimo joogsatay waxay mudadeedu tahay, mudada ka hadhsanayd xubinimada joogsatay.
7- Shirka Guddiga Maamulka ee Rugta, doodahiisa iyo go'aanadiisa waxaa lagu qorayaa diiwaan u gaara ah oo ay saxeexaan Guddoomiyaha iyo xoghayaha Guud ee Rugta.

## Qodobka 10aad

## Xilka Guddiga Maamulka ee Rugta.

1- Hirgelinta ujeedooyinka Rugta loo dhisay oo dhan iyo fulinta go'aanada ay soo saaraan Golaha Guud ee Rugta. iyadoo adeegsanaysa Guddiyo.
2- Doorashada Guddomiyaha iyo Gudoomiye Ku- Xigeenka Koowaad iyo Labaad ee Rugta shirkooda ugu horreeya, marka la doorto Guddiga Maamulka Rugta.
3- Magcaabida xoghayaha Guud ee Rugta.
4- Ogolaanshaha Miisaaniyad sannadeedka Rugta, intaan loo gudbin Guddiga Hanti-Dhowrka iyo Golaha Guud ee Rugta.

## Qodobka 11aad

## Shirka Guddiga Maamulka ee Rugta

1- Guddiga Maamulka ee Rugta wuxuu shirayaa bishiiba hal mar iyo kolkii loo baahdo.
2- Shirka Guddiga Maamulka wuxuu ansaxayaa aqlabiyadda caadiga ah, codayntuna hal dheeri ah.

## Qodobka 12aad.

## Xilka guddoomiyaha Rugta

1- Fulinta hawl maalmeedka Rugta oo dhan.
2- Isugu yeedhida shirka Golaha Guud iyo kan Gudiga Maamulka ee Rugta iyo guddoomintooda,
3- Hubinta, fulinta go'aanada Shirka Golaha guud iyo kan Guddiga Maamulka ee Rugta.
4- Wakiil ka noqoshada Rugta, Maxkamadaha Hortooda.
5- Saxeexa heshiisyada Rugtu ay la galayso iyo arrimaha muhiimka ah.
6- Marka guddoomiyaha rugtu maqan yahay waxaa xilkiisa sii haynaya Guddoomiye ku-xigeenada, siday u kala horreeyaan.

## Qodobka 13aad

## Xoghayaha Guud ee Rugta

1- Rugtu waxay yeelanaysaa Xoghayaha Guud.

## Qodobka 14aad

## Xilka Xoghayaha Guud ee Rugta

1- Habsami u socodsiinta iyo kormeeridda hawl maalmeedka Rugta.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2- Xoghayaha Guud ee Rugta waa hor joogaha Shaqaalaha Rugta, kana masuul ah hawlgelintooda iyo qiimaynta wax qabadkooda.
3- Ka qaybgalka Shirka Golaha Guud iyo kan Guddiga Maamulka Rugta, isagoo xoghaye ka ah, kana qayb qaadanaya doodaha, mase laha codayn.
4- Soo diyaarinta qodobada (ajandayaasha) shirka Golaha Guud iyo kan Guddiga Maamulka Rugta, isagoo ka talo qaadanaya Guddomiyaha Rugta.

## Qodobka 15aad

## Shaqaalaha Rugta

1- Rugtu waxay yeelanaysaa shaqaale u gaar ah
2- Guddiga maamulka ee Rugta ayaa leh xilka shaqaalaynta. Dallacinta, mushahar iyo gunno samaynta, fasaxa, ganaaxa, abaalmarinta iyo shaqo ka joojinta shaqaalaha Rugta, iyadoo la tixgelinaayo shuruucda shaqaalaha ee dalka u degsan.

## QAYBTA 3AAD

## Qodobka 16aad

## Maaliyadda iyo hantida Rugta

Rugta waxaa dakhligeedu ka soo galayaa qaybaha hoos ku cad

1- Khidmadda diiwaangelinta (membership registration fees).
2- Dhigaal sannadeedka laga qaado xubnaha Rugta (annual subscribtion fees).
3- Khidmada laga qaado adeegyada ku sheegan qodobka 3aad ee sharcigan.
4- Kaalmo amaba tabaruc ay ka hesho Dawladda ama cid kaleba.

## Qodobka 17aad.

## Khidmadda diiwaan-gelinta (registration fees).

1- cid kasta oo xubin ka noqota Rugta; wuxuu bixinayaa khidmadda Diiwaan-gelin.

## Qodobka 18aad.

## Khidmadda dhigaal dannadeedka (Annual Subscribtion Fees).

1- Qof amaba Shirkad kasta oo leh jiritaan Sharci ah oo xubin ka ah Rugta, wuxuu bixinayaa Dhigaal Sannadeed (Annual Subscribtion Fees).

## Qodobka 19aad.

## Go'aamin khidmadaha.

Guddiga Maamulka ee rugta ayaa go'aaminaysa, heerka ay noqonayaan khidmadaha ay ka qaadato Rugtu, adeegyada ku sheegan Qodobada 3aad iyo kan 16aad ee sharcigan, iyagoo la kaashanaya Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 20aad

## Kharashka Rugta (Expenditure)

1- Kharashka ku baxaaya hirgelinta hawlaha Rugta, waxaa laga bixinayaa dakhliga Rugta
2- Rugtu waxay awood u leedahay inay maalgelin samayso, markay u suurto gasho.

## Qodobka 21aad.

## Miisaaniyadda Rugta (Budget)

1- guddiga Maamulka Rugtu, wuxuu diyaarinayaa miisaaniyadda dakhliga iyo kharashka laba bilood ka hor dhammadka sannadeedka maaliyadeedka, iyadoo horgeynaysa, shirka Golaha Guud, si uu u ogolaado.
2- Sannad maaliyadeedka Rugtu, wuxuu bilaabmayaa 1da January, waxaanuu dhamaanayaa 31 Disember sannad kasta,
3- Miisaaniyadda waxaa lagu Caddaynayaa Kharashka ku baxaya Maamulka Rugta iyo Hirgelinta hawlaheeda iyo dayactirka hantidooda.

## Qodobka 22aad

## Xisaab-xidhka (Balance sheet).

1- Guddiga Maamulka Rugtu, wuxuu diyaarinayaa xisaab-xidhka saddexda bilood ee ugu horreeya sannad walba gudahooda, sanadkii tegay miisaaniyadiisii, iyadoo la horgaynaayo shirka Golaha Guud ee Rugta si uu u ogolaado.
2- Golaha Guud ee Rugtu; markuu dhegaysto warbixinta Guddiga Hanti -dhawrku ee Rugta, ayuu go'aan ka gaadhaya ogolaansha Miisaaniyadda iyo xisaab-xidhka.

## QAYBTA 4AAD

## Qodobka 23aad

## Guddiga Hanti-Dhawrka Rugta (Council of Auditors).

1- Rugtu waxay yeelan guddi Hanti-dhawr oo laga soo dooranayo ama laga magcaabayo Xubnaha Rugta, aqoon xeel dheerna u leh Cilmiga xisaabaadka (Accountancy).
2- Gudiga Hanti-Dhawrka Rugta, muddadoodu waa laba sano kana bilaabmaya taariikhda la doortay.
3- Haddii guddomiyaha amaba xubnaha Guddiga Hanti -Dhawrka ay xilkooda gudan waayaan caafimaaad awgii ama sabab kale, waxaa bedelaaya xubnaha tirade cod-ka ay heleen ku xigto.
4- Xubnaha Gudiga Maamulka Rugta waxaa ka reeban inay Guddomiye ama Xubin ka noqdaan Gudiga Hanti-dhawrka Rugta.

## Qodobka 24aad

## Awoodda guddiga Hant-dhawrka Rugta

1- Guddoomiyaha iyo xubnaha Gudiga Hanti-dhawrka Rugtu, waxay awood buuxda u leeyihiin inay wadajir buugaagta iyo warqadaha rasmiga ah ee xisaabta rugta u baadhaan, iyagoo xaq u leh inay helaan wararka ku saabsan xisaabaha ay doonaan.
2- Guddiga Hanti-Dhawrka Rugta, waxay warbixintooda u gudbiyaan Golaha Guud ee Rugta.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

## QAYBTA 5AAD.

## QODOBO GUUD

### Qodobka 25aad

### Xeer Hoosaadyada Rugta.

Guddiga Maamulka Rugta wuxuu dejinayaa Xeer-hoosaadyada sharcigan sida: -

b– xeerka Maamulka Rugta (Chamber Administrations Regulations).

t- xeerka xilka iyo waxqabadka Guddiyada, Guddiga Maamulka Rugta.

j- xeerka Doorashada Guddiga Maamulka iyo Guddiga Hanti-dhawrka ee Rugta.

x- iyo Xeerka Dhexdhexaadinta muranka ganacsi (Arbitration). iyagoo la kaashanaya Wasiirka Ganacsiga iyo Wershadaha.

### Qodobka 26aad.

Heshiisyada ay Rugtu galayso waxay noqon doonaan kuwa aan ka soo horjeedin siyaasadda Qaran ee Dhaqaale iyo Shuruucda Dalka.

### Qodobka 27aad.

### Ilaalin Guud (Supervission).

Wasiirka Ganacsiga iyo Wershadaha iyo Rugta waxay yeelanayaan Xidhiidh wada shaqayn Toos ah, iyadoo Wasiirka leeyahay awood ilaalinta guud ah, in hawl-galka Rugtu waafaqsan yahay sharcigan.

### Qodobka 28aad.

### Dhaqan galaka sharcigan.

Sharcigan wuxuu dhaqan geli marka uu saxeexo madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.

Taariikh. 25.. 10..93

(MAXAMED XAAJI IBRAAHIM CIGAAL)
MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADA SOMALILAND



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE